# Amni ku dareemaya TIBRO



tibro.se


*"Tibro amni ah"* waxaa soo saaray degmada Tibro wuxuuna ku socdaa adiga deggan oo ka hawlgala Tibro.

**Wuxuu ka kooban:**

Shilalka iyo dembiyada
Saamaynta cimilada
Dagaal iyo diffaaca loo dhan yahay
Hab dhismeedka digniinta ee jira
Heegan inaad ahaatid
Warbixin iyo saamayn
Warbixinta degmada Tibro
Baro warbixineed oo ku yaal Tibro

**Sawirro tusaale ah:**
Morot Kommunikation iyo Link Arkitekter
**Khariidado:** Christina Jonsson/Fingerprint
**Sawirro:** Thomas Harrysson, Thomas Henrikson, MSB, Tommy Abrahamsson, Christina Froh och Mostphotos
**Daabacaada iyo dib usoo daabicida:**
Skaraborgs Offset 2023





# Waxaad qayb ka tahay amniga iyo heeganka xaaladaha adag ee Tibro...

**Iyadoo si wadajir ah loo kaashanayo dhammaan dadka ku nool iyo kuwa ka hawlgala Tibro ayay degmadu waxay ka shaqaynasaa inay abuurto amni oo ay dhisto heegan ka kooban bulshada maxalliga ah.**

Maadaama aad ka mid tahay dadka deggan waxaad door muhiim ah ku leedahay inaad abuurtid amni, ka hortagtid shilalka oo ka qayb qaadatid heeganka xaaladaha adag ee ka jira Tibro. Waxay tusaale ahaan ku saabsan tahay inaad si fiican ugu soo diyaargarowdid dhacdooyin kala duwan iyo sidoo kale inaad la socotid warbixinaha ku saabsan waxa ka dhacaya agagaarkaaga iyo meelaha kale ee kaa agdhow.

# Shilalka iyo dembiyada

*Aan ka ahayn xaaladaha adag waxaa sidoo kale saamayn nagu yeelan kara shilalka iyo dembiyada. Shilalku waxay mararka qaarkood keeni karaan xaalado adag, laakiin badanaa isku mar ma saameeyaan bulshada oo dhan. Degmada Tibro waxay siyaabo kala duwan iskugu dayaysaa inay yarayso halista inay shilal iyo dembiyo ka dhacaan degmada. Waxaad adiguna si firfircoon uga qayb qaadan kartaa arrintaan adigoo kusoo wargelinaya degmada waxyaabaha shilalka keeni kara, soo sheega dembiyada oo si wayn uga taxadara amniga gurigaaga.*

Shilalka waxaa caadiyan maareeya hey´adda badbaadada degdegga ah, booliska, daryeelka caafimaadka iyo kooxo kaalmeeya dadka xaaladaha adag haystaan tusaale ahaan kooxda-POSOM, taas oo ay maamusho degmadu. POSOM waxay u taagan tahay daryeel nafsiyeed iyo mid bulshadeed markii xaaladaha adag iyo aafooyinku dhacaan. POSOM shaqadeedu waa kaalmo degdeg ah iyo maaraynta xaaladda adag.

## Ka hortagga dembiyada

Waa shaqada booliska in la baaro oo la maareeyo dembiyada la gaysto. Marka laga hadlayo ka hortagga dembiyada iyo sugista amniga waxaa siyaabo kala duwan uga wada shaqeeya booliska, degmada iyo hey´ado/shirkado kale oo bulshada ka jira. Laga soo bilaabo juulay (luulyo) 2023 waxaa degmada Tibro iyo degmooyinka kale ee Iswiidhan ku yaal loo sii caddeeyay xilka ka saaran mas´uuliyadda isku dubbaridka shaqada ka hortagga dembiyada maxalliga ah. Sida sharciga cusub ku cad waa inay degmo walba:

- daraasayn ku samaysaa dembiyada ka dhaca deegaanada hoostaga.
- soo saartaa warbixin ku saabsan xaaladda jirta iyo dejinta qorshaha tallaabooyinka la qaadayo iyadoo lala shaqaynayo booliska maxalliga ah iyo hey´adaha/shirkadaha kale ee maxalliga ah.
- si firfircoon uga qayb qaadato abuuridda iskaashi, la abaabulo kulamo iwm looga hortagayo dembiyada kana qayb qaadanaya in kor loo qaado amniga bulshada maxalliga ah.



*Booliska degmada Annika Strandberg iyo guddoomiyaha degmada Tibro Jan Hanna.*

## Ka qayb qaado Tibro amni ah

Tibro asal ahaan waa bulsho amni ah. Annaga deggan oo ku sugan halkaan ayaa ka wada qayb qaata inay Tibro amni ahaato. Waxaan halkaan kusoo gudbinaynaa talooyin dhowr ah oo ku aadan sidaad uga qayb qaadan kartid amniga:

### Foojignow!

Kusoo wargeli oo qaylo-dhaan usoo dir booliska markii aad ogaatid ama ka shakidid dembi.

### Ihtimaam sii!

Ku biir ama bilow wada shaqayn deriska xaafadaada.

### LU tilmaan wadada saxda ah markii khalad dhaco!

Ku dhiiro inaad u sheegtid markii qof khalad sameeyo ahowna tusaale wanaagsan.

### Kusoo wargeli degmada!

Lasoo xiriir degmada haddii aad dareemaysid amni darro ka jirta goobaha danta guud.

## Sidaan ayaad booliska iyo degmada Tibro ula xiriiri kartaaa:

Wac 112 markii shilal dhacaan iyo dembiyada markaas dhacaya.

Kala xiriir booliska adeegga elektoroonigga ah ee polisen.se ama wac 114 14 si aad ugu soo wargelisid ama ugu soo sheegtid dembi. La soco inuu safka telefoonku dheeraan karo haddii aad wacdid.

La soo xiriir degmada Tibro haddii aad rabtid inaad kusoo wargelisid waxyaalaha shilalka keena ama goobaha aad u aragtid inaysan amni ahayn.

**Telefoon:** 0504-180 00

**Bogga internetka:** tibro.se/synpunkter

# Saamaynta cimilada

*Isbeddelka cimilada waxaa na xasuusiya cimilo aan la isku hallayn karin sida tusaale ahaan sida tusaale ahaan duufaano, roobab mahiigaan ah, abaaro iyo xilliyo hawadu aad u kulushahay. Degmada Tibro waxay si firfircoon uga shaqaynasaa bey´adda la xiriirta qorshaha caalamiga ah ee waaritaanka ee Qaramada midoobay Agenda 2030 iyo "Klimat 2030 – Västra Götaland isbeddel buu samaynayaa", oo ay maamulaan gobolka Västra Götaland iyo Maamulka gobolka.*



**Sidaan ayaad ku yarayn kartaa saamaynta aad ku yeelaynasid cimilada:**

- Dhaqaalee biyaha la cabbo
- Kaxayso baaskiil, lugee oo bas ama tareen raac beddelkii gaariga
- Isticmaal dharka gacan labaadka ah iyo alaabta guriga gacan labaadka ah halkii aad ka iibsan lahayd kuwo cusub
- Dib u isticmaal bacda (caagga), waraaqaha adag iyo macdanta
- Badso inaad cuntid cuntada waddanka gudihiisa laga soo saaray iyo cuntooyinka aan hilibka lahayn

Annaga ku sugan Tibro waa inaan yarayno saamaynta aan ku yeelaynayno bey´adda. Annagoo yarayna wasakhaynta hawada iyo saamaynta aan ku yeelayno cimilada ayaan ku yarayn karnaa inay dhacaan masiibooyin dabiici ah oo baaxad leh, oo ka dhaca Tibro gudaheeda iyo qaybaha kale ee adduunka.

Agenda 2030 iyo Klimat 2030 ayaa sal u ah shaqadeena aan isbeddelka uga samaynano degmada Tibro gudaheeda. Dhowr yoolal cimilada la xiriira ayaa sannad kasta la ansixiyaa. Shaqadaas waxyaalaha hoos yimaada ee degmadu ka shaqaysay waxaa ka mid ah in qandaraaska la bixinayo shuruud looga dhigo in gaadiidku uusan ku shaqayn shidaalka qadiimiga ah iyo fulinta dhowr wax qabad oo dhiirigelin doona in alaabaha la geeyo iyadoo la lugaynayo ama baaskiil lagu geeyo.

Degmada Tibro waxay hiigsanaysaa inay tamar uga dhiganto hawlaheeda. Waxaa sidoo kale si firfircoon looga shaqeeyaa in alaabaha dib loo isticmaalo iyo maalgashiyo tamartada qoraxda laga dhaliyo markii dib u dayactir iyo dhib u dhis la samaynayo. Maalgashiga dib u isticmaalidda wuu sii socon doonaa, hawlaha lagu abuurayo bulsho isticmaasha gaadiid waxtar leh oo waddooyinka lagu lugeeyo iyo kuwa baaskiilka muddnaanta la siinayo. Shaqada bey´adda ee degmada waxay xoogga saaraysaa in la ilaaliyo meelaha duurka ah ee qiimaha bey´adeed iyo dhaqan leh, in la ilaaliyo dhul beereedka iyo in mudnaanta la siiyo kala duwanaanshaha noolaha, tusaale ahaan iyadoo la abuurayo bey´ado ubax badan oo loogu talo galay xasharaadka wax bacrimiya.

Degmada Tibro waxay si guud u mamnuucday in tuubada lagu biyeeyo beerta si aan u dhaqaalaysanno biyaha la cabbo ee naga dhexeeya.

**Degmadu waxay baaritaan qoto-dheer ku samaysay roobabka mahiigaanka ah**

Degmada Tibro waxay fulisay baaritaan qoto-dheer oo lagu darsayo khataraha inay biyo qaadaan dhismayaasha hadda jira iyo kuwa la qorshaynayo in la dhiso labadaba. Baaritaanka qotada-dheer wuxuu gundhig u ahaa qorshaha guud ee hadda la raaco.

# Dagaal iyo diffaaca loo dhan yahay

*Diffaaca loo dhan yahay waa magaca kulmiya diffaaca millatariga ah iyo diffaaca shacbiga ah. Hadafka guud ee laga leeyahay diffaaca loo dhan yahay waa in " awood lagu diffaaco Iswiidhan oo looga diffaaco weerar hubaysan" (Isha daliisha: mbs.se). Diffaaca loo dhan waa inuu ilaaliyo oo diffaaco waddanka, xorriyadeena iyo xaqqa aan u leenahay inaan u noolaano sidaan annagu doorano. Dhammaanteen hal shaqaa inoo taal haddii Iswiidhan khatar soo wajahdo.*



**Diffaaca loo dhan yahay**
Diffaaca loo dhan yahay waa dhammaan hawlaha loo baahan yahay si Iswiidhan loogu diyaariyo dagaal. Diffaaca loo dhan yahay wuxuu ka kooban yahay diffaac millatari ah iyo diffaac shacbi ah.

**Diffaaca millatari (ciidan)**
Diffaaca millatariga ah wuxuu ka kooban yahay Xoogga dalka oo ay ku jiraan Keydka madaniga ah oo sidoo kale shaqadooda ugu wayn tahay inay kaalmeeyaan diffaaca millatariga ah. Xoogga dalka wuxuu diffaacayaa dhulkeena iyo xuduuduheena.

**Diffaaca shacbiga ah**
Diffaaca shacbiga ah wuxuu ku saabsan yahay wax iska caabinta bulshada oo dhan markii khatar dagaal jirto iyo markii dagaal dhaco. Diffaaca shacbiga ah waa shaqada ay qabtaan hey´adaha dawladda, degmooyinka iyo gobollada, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo hey´adaha is xilqaanka ku shaqeeya. Shaqadaas ujeedada laga leeyahay waa in la diffaaco shacabka oo laga shaqeeyo inay tusaale ahaan daryeelka caafimaadka iyo gaadiidku shaqeeyaan markii khatar dagaal jirto iyo markii dagaal dhaco. Markii khatar dagaal jirto iyo markii dagaal dhaco waa in diffaaca shacbiga uu sidoo kale kaalmeeyo Xoogga dalka.

**krisinformation.se**
Heegan sare iyo dagaal:

**Xoogga dalka**
Diffaaca loo dhan yahay:

**MSB – Youtube**
Filinka ku saabsan heegan sare iyo diffaaca loo dhan yahay:

## Waajibka diffaaca loo dhan yahay

Iswiidhan waxaa ka jira waajibka diffaaca loo dhan yahay. Taasi waxay ka dhigan tahay in dhammaan dadka halkaan deggan oo da´doodu u dhexayso 16 iyo 70 sano loogu yeeri karo inay siyaabo kala duwan uga qayb qaataan markii khatar dagaal jirto iyo markii dagaal dhaco. Dadka oo dhan waxaa waajib ku ah inay ka qayb qaataan oo qof walbana waa loo baahan yahay.

Waxaa jira saddex nooc oo ka mid ah waajibka diffaaca loo dhan yahay:

- **Shaqada qaranka** ka mid ah Xoogga dalka.
- **Waajibka shacabka** hawlo ay dawladu go´aamiso.
- **Shaqada qaran ee guud**, taasoo ka dhigan in laga shaqaynayo hey´adaha dawladda kuwaas oo ay khasab tahay inay shaqeeyaan xattaa markii khatar dagaal jirto ama dagaal dhaco. Taasi waxay la micne tahay inaad sii wadi doontid shaqadaada caadiga ah, aad ka shaqaysid ururada is xilqaanka ama xafiiska shaqada kuu dirto shaqo si gaar ah muhiim ugu ah diffaaca loo dhan yahay.




# Qolalka gabbaadka duqaymaha

*Qolalka duqaymaha lagaga gabado waxaa loogu talo galay inay gabbaad u noqdaan shacabka markii dagaal dhaco. Dhammaan qolalka gabbaadka duqaymaha iyo dhismayaasha leh qolalka gabbaadka duqaymaha waxaa lagu calaamadeeyay calaamad. Qol gabbaad duqayn gaar ah kama tirsanid ee waxaad isticmaalaysaa kan kugu dhow markii loo baahdo.*

Soo ogow qolalka gabbaadka duqaymaha ee ugu dhow halka aad deggan tahay iyo halka aad maalintii ku sugan tahay.

Bogga MBS:s waxaa ku jira khariidad kombuyuurtarka ku jirta oo laga heli karo qolalka gabaadka duqaymaha, halkaas waxaad ka arki kartaa qolalka gabbaadka duqaymaha ee ku taal xaafadaada.

Haddii aadan fursad u helin inaad heshid khariidada kombuyuutarka ku jirta ee qolalka gabbaadka duqaymaha waxaad telefoonka 0504-180 00 ka wici kartaa degmada si aad u heshid isagoo lasoo saaray.




**Kasoo hel qolalka gabaadka kugu dhow ee ku jira msb.se/skyddsrum**

# Hab dhismeedka digniinta ee jira

*Hab dhismeedka digniinta bannaanka, Farriin muhiim ah (Viktigt meddelande), ee loo yaqaan "Hesa Fredrik", wuxuu u jiraa si loogu digo bulshada markii diyaargarow sare lagu jiro iyo wakhtiga nabadu jirtaba. Markii aad maqashid dhambaalka waa inaad isla markiiba gudaha gashid oo dhagaysatid Radiyaha Iswiidhen P4.*



*Raadiyaha Iswiidhen P4 ayaa door wayn ka ciyaaraya marka laga hadlayo soo gudbinta VMA:eega, farriimo muhiim ah oo bulshada ku socda.*

Habka dhismeedka digniinta bannaanka waxaa la tijaabiyaa afar jeer sannadkii. Midka koowaad waa isniinta aan fasaxa ahayn ee ku jirta maarso, juun, sebtembar iyo diisambar saacada 15.00. Waxaa markaas qaylinaya dhambaalka bannaanka ee " Farriin muhiim ah" oo laga maqlayo Tibro gudaheeda iyo magaalooyinka kale ee qalabkaan ku rakiban yahay. Saacadu marka ay tahay 15.05 ayaa lagu soo afjaraa dhambaalka "Khatartii way dhamaatay".

**Wakhtiga nabadu jirto – Farriinta muhiimka ah ee bulshada ku socota (VMA):**

- Dhambaalka 7 ilbiriqsi – joogsi 14 ilbiriqsi – dhambaal 7 ilbiriqsi – joogsi 14 ilbiriqsi iwm.
- Markii aad maqashid farriinta waa inaad gudaha soo gashid, daaqadda, albaabada, hawo qaada xirtid raadiyahana Iswiidhen P4 dhagaysatid.
- Khatartii way dhamaatay – si aan kala go´ lahayn 30 ilbiriqsi.

**Heegan sare – qaylo-dhaanta heeganka iyo qaylo-dhaanta ka digta duqaymaha diyaaradaha dagaalka**

**Qaylo-dhaanta heeganka:**

- Dhambaal 30 ilbiriqsi – joogsi 15 ilbiriqsi – dhambaal 30 ilbiriqsi – joogsi 15 ilbiriqsi iwm.
- Qaylo-dhaantaan waa qaab dawladu ku wargelinayso inay jirto khatar dagaal oo degdeg ah ama in waddanku dagaal ku jiro.
- Markii aad maqashid dhambaalka waa inaad isla markiiba gudaha gashid oo dhagaysatid raadiyaha Iswiidhen P4. Isku diyaari inaad sida ugu dhaqsiyaha badan guriga uga baxdid adigoo qaadanaya waxa kuugu muhiimsan (arag boorsada heeganka ee bogga heeganka guriga).
- Haddii dagaalka lagugu qoray waa inaad isla markiiba aadid goobta lagugu wargeliyay inaad iska xaadirisid.



## Dhagayso – Sidaan ayay u dhawaaqayaan dhambaaladu

msb.se waxaa ku jira linkiyo codad la dhagaysan karo oo faham fiican kaa siinaya sida dhambaalada kala duwan u qayliyaan. Ka raadi ”utomhusvarning” ee ku jira msb.se dooro natiijo ”Utomhusvarning – Viktigt meddelande” sidaas ayaad bogga codadka duuban ku jiraan kusoo gelaysaa. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa QR-koodyaasha hoose si aad toos u gashid codadka duuban.

| Wakhtiga nabada ah – Farriinta muhiimka ah (VMA) | Wakhtiga nabada ah – Khatartii way dhammaatay | Heegan sare – Qaylo-dhaanta heeganka | Heegan sare – Qaylo-dhaanta duqaymaha diyaaradaha dagaalka |
|---|---|---|---|

**Qaylo-dhaanta duqaymaha diyaaradaha dagaalka:**

- Dhambaal mawjado gaaban leh oo 1 daqiiqo soconaya. Markii aad maqashid dhambaalkaan waa inaad isla markiiba raadsatid gabbaad, tusaale qolalka looga gabado duqaymaha ama guriga aad ku sugan tahay qaybta dhulka ka hoosaysa.
- Khatartii way dhammaatay – dhambaal aan kala go´ lahayn 30 ilbiriqsi gudahood.

# Heegan inaad ahaatid

*In guriga heegan lagu ahaado waxay ka dhigan tahay inaad is dabari kartid ugu yaraan hal asbuuc adigoo aan bulshada wax caawinaad ah ka helin markii dhacdo wayn oo khatar ah dhacdo. Waxaa waxyaalaha muhiimka ah ka mid ah in la helo cunto, biyo iyo lacag caddaan ah, kulayl haddii qabow jiro raadiyaha wareejinta ku shaqeeya ama raadiye batari ama tamarta qoraxda ku shaqeeya, si looga helo warbixinaha ka imaanaya hey´adaha dawladda Iswiidhen.*






## Maxaad guriga heegan ugu gelaysaa?

Sababta ka dambaysa in guriga heegan lagu ahaado waa in degmada markii xaalad adag ama dagaal dhaco ay xoogga saari doonto inay hubiso in hawlaha muhiimka u ah bulshada ay shaqeeyaan. Degmadu waxay sidoo kale u baahan tahay inay ugu horrayn xoogga saaraan inay caawiyaan kuwa baahida ugu badan u qaba.

Degmadu waxay sidoo kale u baahan tahay inay wakhti u hesho inay is abaabusho si ay u kaalmeeyaan bulshada oo sidaas darteed waa muhiim in qof walba mas´uuliyad iska saaro inuu si fiican guriga heegan ugu ahaado oo muddo isku filnaado.

## Buugga warbixineed " Ku saabsan xaalad adag ama dagaal"

Buugga warbixineed " Ku saabsan xaalad adag ama dagaal" wuxuu ku saabsan yahay sidaan si fiican ugu sii diyaargaroobi lahayn haddii tusaale ahaan ay dhacaan shilal khatar ah, aafo cimilo, weerar kombuyuutar ama khilaafaad millatari. Haddii aadan horay guriga ugu haysan buugga warbixineed ee " Ku saabsan xaalad adag ama dagaal" waxaa laga heli karaa xafiiska guriga degmada ama Maktabada buugaagta Tibro. Waxaa sidoo kale kombuyuutarka laga soo degsan karaa msb.se.

# Kuwaan ayaad guriga ugu baahan tahay

## Cunto

Waa muhiim in cunto dheeraad ah oo tamar fiican laga helayo guriga lagu haysto. Isticmaal cunto waaraysa oo dhaqso lagu karsan karo, u baahan biyo yar ama la cuni karo iyadoo aan la karin.

## Biyo

Biyaha cad nolosha waxay u yihiin lagama maarmaan. Ka buuxso dhalooyin iyo jirgaano. Ku xisaabtan ugu yaraan 3 litir qofkiiba inuu u baahan habeen iyo maalin. Haddii aadan isku hubin tayadooda waa inaad iska karisid biyaha. Haddii musquluhu aysan shaqaynayn waxaad soo qaadan kartaa baco waawayn ama bac madow oo aad kursiga musqusha dhex dhigi kartaa. In nadaafadda gacmaha fiican tahay waa muhiim si cudurrada faafa la iskaga ilaaliyo.

## Kulayl

Haddii korontadu tagto iyadoo lagu jiro xilli qaboobe gurigu dhaqso buu ku qaboobayaa. Qol iskugu taga, daaqada bustayaal sura, dhulka roogag dhiga oo buul miis ka hoos dhisa si kulaylku usii joogo. Ku fekar khatarta inuu dab kaco. Demi dhammaan shumacyada ama kulayliyaha ka hor inta aydin seexan. Hawada u fura si joogto ah si ogsijiin usoo galo.

## Is gaarsiinta

Markii xaalad adag timaado waxaad u baahan tahay inay kusoo gaaraan warbixino muhiim ah oo ka imaanaya hey´adaha dawladda, weliba Raadiyaha Iswiidhen P4. Waxaad sidoo kale u baahan tahay inaad la socotid wararka warbaahinta, la xiriirtid ehelkaaga iyo saaxibadaa oo xaaladaha degdegga ah aad heli kartid badbaadada degdegga ah, daryeelka caafimaadka ama booliska.

## Boorsada heeganka ("Go bag")

Haddii aad wakhti gaaban gudihiis guriga uga baxdid sababtay rabta ha keentee, waxaa fiican inaad horay usii diyaarsatay boorso iyo liis ay ku qoran yihiin waxaad si degdeg usii qaadan kartid. Tusaale waxyaalaha boorsada heeganka ku jira kara:

- Dukumentiyada aqoonsiga
- Dawooyinka muhiimka ah iyo qalab caawinaad
- Lacag caddaan ah
- Telefoonka gacanta, cabbeeye telefoon, powerbank iyo buug telefoon
- Raadiye markii la wareejiyo is cabaynaya, ku shaqeeya batari ama tamarta qoraxda
- Wax la cuno ama la cabbo
- Dhar cimilada ku haboon

### Asbuuca heeganka

Asbuuca heeganka ( horay loo oran jiray (asbuuca heeganka xaaladaha adag) wax qabad warbixineed oo sannadle ah oo loogu talo galay inuu kordhiyo iska caabinta dadka ee xaaladaha adag iyo dagaalada. Waxaa isku dubbarida MSB, Hey´adda Ilaalinta bulshada iyo heeganka, waxaana la fuliyaa asbuuca 39aad.

Waxaad warbixino intaa ka badan oo faa´ido leh oo ku saabsan heeganka guriga ka helaysaa bogga MSB, msb.se. Ku qor heeganka guriga meesha wax laga raadsho ama isticmaal koodhka-QR ee halkaan ku dheggan si aad u gashid bogga ku saabsan heeganka guriga.

# Warbixin iyo saamayn

*Ka hor iyo markii lagu gudo jiro xaalad adag ama haddii dagaal dhaco waxaa jira qolooyin badan oo warbixin sii gudbin kara oo saamayn dhinacyo badan dadka ku yeelan kara. Waa muhiim inaad iska hubisid ilaha daliisha oo aad iska hubisid in warbixinta aad helaysid iyo midda aad sii gudbinaysid labaduba ilo lagu kalsoonaan karo ka yimaadeen.*



In loo qalab uruursado sidii la iskaga caabbin lahaa warbixinaha marin habaabinta ah – oo iska ilaalisid in lagu siro – waxay qayb muhiim ah ka tahay heeganka guud. Waxay tusaale ahaan ku saabsan tahay in laga fiirsado ilaha daliisha oo gacanta koowaad la helo oo la faafiyo warbixinaha ka yimaada hey´adaha dawladda iyo warbaahinta dimuqaraadiga ah ee la yaqaan.

## bliintelurad.se

Ma rabtaa inaad kusii fiicnaatid inaad garatid warbixinaha bugta ah ee marin habaabinta ah? Eeg bliintelurad.se. Waxaad halkaas ka heli kartaa xeelado dhowr ah oo kaa dhigaya qof iska caabin leh.

**Cidda mas´uulka ka ah bogga bliintelurad.se:**

Hey´adda diffaaca nafsiyadeed (MPF)

## krisinformation.se

Krisinformation.se waa bog gudbiya warbixino ka yimaada hey´adaha dawladda iyo kuwa kale ee mas´uuliyada haya markii xaalad adag ama dhacdo khatar ah dhacdo.

## lilla.krisinformation.se

Lilla.krisinformation.se waa bog internetka ah oo loogu talo galay carruurta iyo dhalinyarada. Bogga waa qayb ka mid ah krisinformation.se iyo Hey´adda ilaalinta bulshada iyo heeganka, MSB.



# Warbixinta degmada Tibro

*Kanaalada degmadu isticamalayso waxay ku xiran yihiin dhacdada iyo baaxadeeda. Waa kuwaan dhowr tusaale.*



## tibro.se iyo kanaalo kale oo kombuyuutarka ah

Degmadu waxay illaa xad warbixino cusub oo ku saabsan dhacdooyinka taagan kusoo qori doontaa bogga internetka ee tibro.se warbixintana waxaa lasoo gelinayaa bogga hore.

Warbixinta lagu daabici doono tibro.se waxaa sidoo kale lagu gudbin doonaa kanaalada baraha bulshada sida Facebook iyo Instagram.

## Warbaahinta

Markii ay dhacdooyin waawayn dhacaan waxay degmadu si firfircoon uga shaqayn doontaa inay warbixino ka gudbiso kanaalo kala duwan oo warbaahineed sida wargaysyada, raadiyaha iyo dhalada Tv-ga.

## Warbixin telefon

Markii dhacdooyin aan caadi ahayn oo wakhti dheer soconaya dhacaan waxay degmadu ka shaqayn doontaa in telefoonka warbixin lagu gudbiyo, halkaas ayaa soo wici kartaa haddii aad su´aalo qabtid iyo/ama haddii aad rabtid inaad warbixin soo gudbisid. Degmada ayaa kanaaladeeda is gaarsiinta kasoo gudbin doonta warbixin ku saabsan lambarka telefoonka warbixinta laga helayo.

## Baro warbixineed la tagi karo

Haddii kanaalada caadiga ah ee is gaarsiinta sida bogga internetka iyo emaylka ay shaqayn waayaan waxay degmadu hawlgelin kartaa tiro baro warbixineed oo la tagi karo oo meelo kala duwan magaalada uga yaal. Kasii akhri baalka soo socda ee buuggaan warbixineed mawduuca " Baro warbixineed oo ku yaal Tibro" hoostiisa.

## VMA – Farrriin muhiim ah oo bulshada ku socota


VMA waxaa la baahiyaa dhambaal qaylo- dhaan ah oo laga baahiyaa waxa loogu yeero " Hesa Fredrik". Laakiin VMA waxaa sidoo kale laga baahiyaa raadiyaha iyo/ama sidii farriin qoraal ah oo dhalada TV-ga kusoo noqnoqanaysa.

**113 13**

waa lambarka xaaladda adag ee heer qaran oo degmadu u isticmaali doonto inay ku kabto ama ku beddesho telefoonka warbixinta laga helo.

# Baro warbixineed oo ku yaal Tibro






## RANSBERGS SKOLA

Barta warbixinaha ee ku taal Fagesanna-Ransberg waxay ku dhex taal iskuulka Ransberg. Wixii kulamo toos ah waxaa lagu qaban doonaa haalka isboortiga iskuulka.







## BAGGEBOSKOLAN

Iskuulka Baggeboskolan waxaa lagu dhejinayaa sabuurad warbixinaha cusub lagu soo qoro haddii loo baahdo waxaa lagu dhejinayaa mid ka mid ah daaqadaha u dhow iridda qolka dharka lagu beddesho ee haalka isboortiga.

Wixii kulamo toos ah waxaa lagu qaban doonaa haalka isboortiga, oo laga soo gelayo iridda wayn.

## GURIGA DEGMADA

Guriga degmada ayaa lagu dhejinayaa sabuurad warbixinaha cusub lagu soo qoro haddii loo baahda, dhanka daaqada xafiiska qaabilaada ee Centrumgatan usii jeeda.

Kulamo toos ah haddii loo baahdo waxaa lagu qaban doonaa qolka kulanka Galaxen (suuqii hore), kaas oo laga soo geli karo iridda ka timaada Fredsgatan.

## FÅGELVIK

Barta warbixinta ee Fågelvik waxaa lagu dhejinayaa sabuurad warbixinaha cusub lagu soo qoro qaybta dhalada ah ee iridda maktabada buugaagta iyo qolka la iskugu tago ee Forum.

Wixii kulamo toos ah waxaa lagu qabanayaa Forum.

*Markii xaalad adag lagu jiro waxaa muhiim ah inaad heshid warbixin sax ah. Haddii telefoonka iyo internetka aysan shaqaynayn markii dhacdo khatar ah ama dhacdo wayn dhacdo way ku adkaanaysaa degmada inay warbixin gudbiyaan. Mararkaas oo kale waxay degmada Tibro hawlgelin doontaa baro warbixineed, goobo loogu imaan karo, halkaas oo aad imaan kartid si aad warbixin cusub uga heshid waxa dhacaya.*



Degmada Tibro waxay leedahay afar baro warbixineed oo la isticmaali karo markii dhacdooyin gaar ah dhacaan. Goobahaas waxaa jiri doona sabuurado warbixinaha cusub lagu soo dhejiyo degmaduna halkaan waxay shacabka ugu qaban karaan kulamo wada hadal iyo warbixineed. Baraha warbixineed waxaa la isticmaali doonaa markii kanaalada caadiga ah ee is gaarsiinta – bogga internetka tibro.se, kanaalada warbaahinta baraha bulshada iyo adeegga telefoonka – markii aan la heli karin ama lagu kalsoonaan karin sabab kasta ha keentee. Sabuuradaha warbixinaha cusub lagu soo dhejiyo ee baraha warbixineed waxay dhammaantood ku yaaliin daaqada gadaasheeda oo bannaankaa laga akhrin karaa. Barta warbixineed waxaa sidoo kale laga wici karaa 112 haddii khadka telefoonada uusan shaqaynayn.

## Baraha amniga ah

Baraha amniga ah waxaa loo aasaasayaa si loo kaalmeeyo dadka meesha deggan ee dhibku soo gaaray inta bulshadu khalkhalka ku jirto, tusaale ahaan markii korontada iyo kulaylku si baaxad wayn u go´aan. Barta amniga ah dadka degmada deggan iyo dadka ayaa tusaale ahaan isku kulayln kara oo ku heli kara warbixin ku saabsan dhacdada taagan. Baraha amniga ah waxaa laga aasaayaa goobaha ku haboon markii loo baahdo.

# Amni ku dareemaya TIBRO

**Iyadoo lala kaashanayo dhammaan dadka ku nool iyo kuwa ka hawlgala Tibro ayay degmadu waxay ka shaqaynasaa inay abuurto amni oo la dhiso heegan xaaladaha adag lagu wajaho oo bulshada maxalliga ah ka kooban.**

Buugaan warbixineed waxaad wax kasii ogaan doontaa sida degmada Tibro iyo hey´adaha dawladda ee kale uga shaqaynayaan amniga iyo heeganka iyo waxaad adigu samayn kartid si aad kor ugu qaadid amnigaaga oo uga qayb qaadatid sidii loo heli lahaa Tibro amni ah.

*Inaan aamino awoodeena. In la aamino in wax kasta suurtagal yihiin inta aan ka wada shaqaynano. In la qorsheeyo mustaqbalka laakiin lagu noolaadu wakhtiga la joogo. Inaan iska fikarno dadka kalena ka fikarno. Taas weeye Tibro.*

TIBRO

Tibro kommun
Centrumgatan 17
543 80 TIBRO

*Telefoon:* 0504-180 00
kommun@tibro.se
www.tibro.se